



## **Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

**WARSAXAAFADEED 009/2012**

### **Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud u qaabilsan Soomaaliya oo caddeeyay in aad uga xunyahay dilka weriyaha Soomaaliyeed**

*Muqdisho 24 May 2012* – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay (SRSG) uu qaabilsan Soomaaliya, Dr. Augustine P. Mahiga, ayaa aad uga xumaaday dilka naxariis darrada ah ee maanta magaalada Muqdisho loogu geystay weriye Soomaaliyeed. Weriye Axmed Cadow Canshuur oo ahaa weriye ka tirsan Idaacadda Shabeelle ayaa lagu toogtay laguna dilay magaalada Muqdisho maanta oo Khamiis ah. Weriyahan waa kii lixaad ee lagu dilo Soomaaliya sannadkan.

“Waxaa la wada ogyahay in weriyeyaasha Soomaaliyeed ay ku shaqeeyaan xaaladda ugu adag adduunka. Laakiin taasi ma aha inay ka dhigayso inay fududahay in la aqballo marka mid si naxariis darra ah loo dilo. Axmed Cadow Canshuur waxaa loo toogtay si arxan la’aan waxaana lagu maagay inuu gudanayo xirfadiisa weriyenimo, taasoo ah arrin asaasi ah si loo helo bulsho xor ah oo waxtar ah,” ayuu yiri Dr. Mahiga. Sida uu sheegay Guddiga Badbaadinta Weriyeyaasha, Soomaaliya waa dalka labaad ee ugu badan dilka weriyeyaasha sannadka 2012, waxaa keliya ka horeysa Suuriya.

“Waxaa aad ugu murugo badan in dilkan uu ku soo beegmay waqti uu socdo shir looga hadlayo arrimaha dastuurka oo ay madaxda Soomaaliyeed ku muujiyeed inay taageero aan leexleexad lahayn u hayaan xoriyyada hadalka”, ayuu yiri Dr. Mahiga.

Toddobaadkii hore, Wasaaradda Arrimaha Dastuurka iyo Dibuheshiisiinta ayaa magaalada Muqdisho ku qabatay shir wadatashi oo socday laba maalmood loogana hadlayay xoriyyada hadalka, sharciga warbaahinta iyo caddaaladda xilliga kalaguurka. Shirku wuxuu soo saaray talooyin loogu talagalay Qabyo-qoraalka Dastuurka Ku Meelgaarka. Doodihii ka dhacay shirka waxaa xoogga lagu saaray dhibaataada haysata xoriyyada hadalka ee madaxda bulshada rayidka iyo weriyeyaasha, taasoo caddeysay baahida loo qabo in la helo garsoor wanaagsan si dembiileyaasha loo hor keeno maxkamad.

Ra’iisal Wasaaraha Soomaaliya ayaa mar labaad ku celiyay siday uga go’antahay Dowladdii dhammeynta la xisaabtan la’aanta dadka waxyeelleeya weriyeyaasha.

Danjire Mahiga ayaa tacsii tiiraanyo leh u diray qoyska, saaxiibada iyo dadka ay wada shaqeeyaan Md. Canshuur, wuxuuna mas’uuliyiinta Soomaaliyeed ugu baaqay inay

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Nick Birnback/Susannah Price, Madaxa Xafiiska Isgaarsiinta Guud, Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (Nairobi, Kenya)

Tel: +254 20 762 6898 / 6805 or +254739976888

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

[www.unpos.unmission.org](http://www.unpos.unmission.org)



## **Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

baaritaan ku sameeyaan dilka Md. Canshuur, xaqiijiyaana in kuwii ka dambeeyay dilkan maxkamad la horkeeno.

“Dilkan soo noqnoqday waa inuu joogsadaa, ayuu caddeeyay Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud”.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Nick Birnback/Susannah Price, Madaxa Xafiiska Isgaarsiinta Guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (Nairobi, Kenya)

Tel: +254 20 762 6898 / 6805 or +254739976888

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

[www.unpos.unmission.org](http://www.unpos.unmission.org)